

# Su'aalaha Inta Badan La Iswaydiiyo ee Montessori



Isticmaal tilmaamtan si aad uga caawiso inaad waxbadan ka ogaato shahaadada Montessori ama xogta kaa caawinaysa inaad buuxiso shuruudahaaga waxbarashada liisanka.

**Waa maxay shahaadooyinka Montessori, tayada, iyo dibloomada ay ansixiyeen cida kale kuwaasoo buuxinaya shuruuda waxbarashada liisanka?**

Kuwa soo socdaa waa shahaadooyin kale oo ay DCYF ansixisay si loo buuxiyo shuruudaha waxbarashada liisanka ee barnaamijka waxbarashada barbaarinta:

- Waxbarashada Montessori waxa bixiya barnaamijka la ansixiyay ee MACTE
- Ansixinta waxbarashada Montessori waxa bixiyay AMI (American Montessori International (Montessori Caalamiga ah ee Maraykanka))
- Ansixinta waxbarashada Montessori waxa bixiyay AMS (American Montessori Society (Montessori ee Bulshada Maraykanka))

Ansixintan waxbarasho waa in lagu abaalmaryaa mid kamid ah kooxahan soo socda:

- Ilmaha-yar iyo Socod-baradka (Dalashada - 3)
- Caruurnimada Hore (Da'aha 2.5 - 6)
- Dugsiga-Hoose Montessori 1 (Da'aha 6 - 9)

## Waa maxay MACTE?

MACTE, Montessori Accreditation Council for Teacher Education (Golaha Ansixinta Waxbarashada Macalinka ee Montessori), waa haayada kaliya ee ay aqoonsantahay U.S. Department of Education (Waxda Waxbarashada ee Maraykanka) ee awood u leh inay abaalmariso ansixinta Barnaamijka Waxbarashada Macalinka. MACTE ma bixiso ansixinta dugsiga.

Dhamaan Barnaamijyada Waxbarashada Macalinka la Ansixiyay ee MACTE waxa lagu taxay wabsaaytka MACTE [www.macte.org](http://www.macte.org).

## Halkeen ka ogaan karaa waxyaabo badan oo ku saabsan shuruuda waxbarashadayda?

Si aan u ogaado waxbadan oo ku saabsan shuruuda waxbarasho ee ku salaysan dooraaga WAC ee kujira MERIT:

- Dib u eeg u Aqoonta Shaqaalaha Guud [https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS\\_0039.pdf](https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0039.pdf)
- Isticmaal jaantuska Waxbarasho ee U dhigma si aad u go'aamiso xulashooyinka laga heli karo [https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS\\_0037.pdf](https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0037.pdf)

## Ka waran hadii aanan arag shahaadayda Montessori, ansixinta, ama dibloomada ku liistaysan sida u dhiganta?

Haddii shahaadada Montessori ama aqoonsigaaga aan lagu liistayn aqoonsi beddelka ah oo ay ansixisay DCYF oo aad aaminsan tahay in ay taasi dhacdo, goobaha wax-barashada ayaa codsan karaa 'Program Review for Staff Qualifications' (Barnaamijka Dib u Eegista Aqoonta Shaqaalaha) codsiga iyadoo lagu dirayo [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov).



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Hadii aan haysto ansixinta Montessori, miyaan u baahanahay inaan dhamaystiro Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Cunuga)?

Hadii ansixintaada Montessori lagu diwaangaliyay MERIT, waxaad ku haboontahay shuruuda Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Cunuga) adigoo u maraya ansixin kale: Waxbarashada ECE + DCYF Nidaamyada Onlaaynka ah.

Si loo dhamaystiro doorashadan:

- Dhamaystir dhamaan shanta “Federal Health & Safety” (Badqabka & Caafimaadka Fadaraalka) ee nidaamyada DCYF Goobta Waxbarasho ee Onlaaynka ah [www.dcyftraining.com](http://www.dcyftraining.com). Tan waxa kujira:
  - Dhibaataaynta Xanuunka Madaxa
  - Udiyaargarowga Xaalada Degdega & Masiibada
  - Qoysaska Waajahaya Guri laaanta
  - Warbixiyaha Mudaysan – Aqoonsiga iyo Kawarbixinta Dhibaataaynta Cunuga
  - Maaraynta Caafimaadka
- Udir iimayl [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov) si aad u hesho Diwaankaaga Aqoonta cusub ee MERIT.

Ee nidaamyada ansixino dheeraad ah si aad u buuxiso CCB, eeg hagahaaga si aad u dhamaystiro Child Care Basics (Asaasiyaadka Daryeelka Cunuga) ee laga helayo [https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS\\_0035.pdf](https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0035.pdf).

## Miyaan Heli karaa saacadaha adeega shahaadayda Montessori?

Si aad u hesho saacadaha shaqada ee shahaadooyinka Montessori iyo aqoonsiga raac tilmaamaha codsiga hoos ku xusan ee shahaadadaada ama nooca aqoonsiga.

Shahaado ama Nooca Ansixinta	Sideen ku helayaa saacadaha shaqada?	Wakhtiga Soogudbinta
Waxbarashada Montessori ee lagu kasbado shaqada koorsada (MACTE, AMI, AMS)	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Dhameystir qeybta Shaqada Koleejka ee Codsiga Waxbarashada kujira MERIT.</li> <li>• U soo gudbi nuqul ka mid ah AMI, AMS, ama MACTE qoraalka aan rasmiga ahayn <a href="mailto:education.verification@centralia.edu">education.verification@centralia.edu</a></li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Keliya soo gudbi shaqada koorsada dhammaatay saddexdii sano ee la soo dhaafay.</li> <li>• Saddex koorso oo keliya ayaa la soo gudbin karaa sannad kasta.</li> </ul>
Dhammaan shahaadooyinka kale ee Montessori ee aan lagu kasban shaqada koorsada kuleejka	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Soo gudbi codsiga Soojeedinta Waxbarashada Socota ee kujira MERIT.</li> <li>• U soo gudbi koobiga shahaadada dhammaystirka ama ansixinta <a href="mailto:MERIT@dcyf.wa.gov">MERIT@dcyf.wa.gov</a></li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Tababarka waa in lagu soo dhamaystiraa 12 bilood ee la soo dhaafay.</li> </ul>



## Doorkeyga Montessori kuma jiro liiska kaasoo ah doorka barbaarinta. Sideen ku ogaan karaa waxa ay yihiin liisankayga shahaadooyinka shaqaalaha?

Haddii magacaaga shaqadu aanu si sax ah ugu dhigmin doorka WAC, ka firso waxa aad qabato oo dooro doorka WAC ee MERIT ee sida ugu fiican ugu haboon masuuliyadaada. Doorka shaqada ee ku qoran MERIT wuxuu ku xiran yahay shahaadooyinka shaqaalaha waana inuu ahaadaa mid sax ah intii suurtagal ah. Fadlan la shaqee agaasimaha barnaamijkaaga ama kormeeraha goobta si aad u dhamaystiro doorashadaada.

Jaantuska Go'aaminta Doorka oo kooban ayaa diyaar ah si uu kaaga caawiyo go'aaminta doorkaaga iyo masuuliyadaahaaga. waxaad heli kartaa <https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/PDRoleDeterminationChart.pdf>

## Su'aalo dheeriya?

limayl: [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov)

Teleefon: 1 (866) 482-4325, ikhtiyaarka 5